

## **Tijaabo Deeq Bixinta Ka Qaybqaadashada EE HCF: Awood-dhisidda hay'adaha ay bulshadu hoggaamiso (EDC- led) ee sinnaanta-qalanta ee Hamilton.**

**Waqtiga dalabka codsigu ku eg yahay:** Talaado, 26ka March, 2024 5:00  
Galabnimo EST

Deeq bixinta ka qaybqaadashadu waa mid kalsooni ku salaysan, hab bulshadu isku hawlisay si wax loo deeqo taas oo u wareejisay awoodda go'aan-qaadashada kuwa ay saamaynta ugu badan ku leedahay maaliyaddu.

Tijaabada Deeq Bixinta Ka Qaybqaadashada ee Mu'asasada Bulshada Hamilton waxay ku casuuntaa codsiyada ururada u adeega oo ay hogaamiyaan bulshooyinka xaqa u leh (EDCs) si ay ugu biiraan hey'adaha deeq bixinta si loo go'aamiyo baahiyaha bulshada una qoondeeyaan lacag. Diiradsaarka iyo ujeeddada lacagaha ayaa ah dhisidda awoodda hay'adaha ay bulshadu hoggaamiso ee sinnaanta u qalanta ah (EDC). Ururadani waxay si gaar ah ugu taagan yihiin inay ka jawaabaan baahiyaha degdega ah ee maxaliga ah waxayna leeyihiin aqoonta iyo khibrada si ay saamaynta ugu wanaagsan ugu yeeshaan nololsha iyo caafimaadka EDC-yada.

Maalgelinta loo heli karo Tijaabada Deeq Bixinta Ka-qaybgalka ee 2024 waa \$500,000. Hay'adaha ka qayb galaya Wareega Bixinta waxay heli doonaan deeqda ugu yar ee \$10,000. Qoondaynta maalgelinta ee hadhay waxa go'aamin doona hey'adaha wax bixinaya.

### **Xaq u yeelasho: Yaa codsan kara?**

HCF Habkeeda Ka Qaybqaadashada Qeeq Bixinta Tijaabada ee EOI waxay u furan tahay **Hay'adaha Bulshada Hogaamiya ee Sinnaanta Mudan (EDC-led) ee ka hawlgala bixiyana adeegyada Hamilton.**

**Si aad xaq ugu yeelatid, ururku waa inuu matalo ugu yaraan mid ka mid ah lixda bulsho ee EDC ee mudnaanta leh ee hoos ku taxan lehna miisaaniyad sanadeed ka yar \$1,000,000.**

### **Waa kuwee bulshooyinka EDC ee mudnaanta u leh Tijaabada Deeq Bixinta Ka Qaybqaadashada ee HCF?**

- 2SLGBTQ+
- madow
- dhagool iyo naafo
- dadka asalka ah
- la faquuqay
- dumar, gabdho iyo ginsiga kala duwan

### **Waa maxay ururka ay EDC hoggaamiso?**

Si aad ugu qalanto EOI-daan, ururada ay hogaaminayso EDC waa inay lahaadaan mid kasta oo ka mid ah dhinacyadan:

- Waajibaad cad oo loogu adeegayo dadweynaha EDC
- Inta badan hoggaanka, guddiga iyo shaqaalaha oo ka tarjumaya EDC
- Hawlgal iyo hawlo lagu wargeliyay waayo-aragnimada iyo aqoonta EDC

### **Intaas waxaa dheer, hey'adaha u qalma waxay muujin doonaan kuwaan soo socda:**

- Miisaaniyad hawleed oo ka yar \$1M
- Baahiyaha karti-dhisidda ee la xidhiidha hawl-gal, barnaamij, dhaqaale, ama bisayl urureed.
- Rabitaanka ka qaybqaadashada waayo-aragnimada deeq-siineed ee wada-shaqeynta taas oo go'aamin doonta mudnaanta iyo qoondaynta lacagaha la heli karo. Waxaan filaynaa in tani ay dhici doonto laba maalin badhkood inta u dhaxaysa 8da Abriil, 2024, iyo 26ka Abriil, 2024.
- Heerka samafalka ama kafaalaqaad maaliyadeed. Ururada aan lahayn kafaala-qaade maaliyadeed waxa lagu dhiirigelinayaa inay la xidhiidhaan Elizabeth Webb, Isku-duwaha Deeqaha email ahaan [e.webb@Hamiltoncommunityfoundation.ca](mailto:e.webb@Hamiltoncommunityfoundation.ca) si ay u sahmiyaan fursadaha.

### **Sidee Buu u Shaqeeyaa Qaabka Tijaabo Deeq Bixinta Ka Qaybqaadashada ee HCF?**

Waxaa jira laba kooxood oo go'aan-qaadayaal ah oo ku jira Mashruuca Deeq-bixinta Ka-qaybgalka ee HCF, Guddiga Bulshada iyo Hey'adaha wax Bixinta. Gudida bulshadu waxay diyaariyeen Wicitaanka EOI waxayna dib u eegi doonaan dhamaan kuwa EOI ah ee xaq u leh oo codsiga wakhtiga ku xareeyey. Wareega Bixinta waxa uu ka koobnaan doonaa ururada ay soo xushaan Gudida Bulshadu iyada oo loo marayo habka EOI. Kuwa soo socda ayaa ah tillaabooyinka muhiimka ah ee habka:

1. Ururada ay EDC hogaamiso waxay soo gudbiyeen EOI-yadii.
2. Shaqaalaha HCF waxay dib u eegayaan dhammaan EOI-yada/ururada xaq-uyeelashadooda.
3. Dhammaan EOI-yada xaqqa u leh waxaa loo gudbinayaa Guddiga Bulshada si ay dib u eegis ugu sameeyaan.
4. Gudida Bulshadu waxay dib u eegayaan EOI-yada waxayna dooranayaan ilaa 10 urur si ay u noqdaan ururrada deeqda loo xushay.
5. Deeq qaatayaasha waxay kulmayaan laba maalmood oo maalin badhkeed ah, oo ay weheliso taageerada fududeeyaha, waxay go'aamiyaan sida loogu qaybinayo maalgelinta la haayo dhexdooda. Ururada loo xushay Wareega Deeq Bixinta waxay heli doonaan deeqda ugu yar oo ah \$10,000.

6. Ururrada Deeq Bixinta waxay kulmi doonnaan mar kale 2025 iyo 2026 si ay dib u eegis ugu sameeyaan baahiyaha dhisitaanka iyo qaybinta lacagaha la heli karo ee xubnaha ururrada.

## **Ujeeddada Maalgelinta Iyo Mudnaanta**

### **Maalgelintaan waxaa loogu talagalay inay taageerto karti-dhisidda hay'adaha Sinnaanta-u-qalma ee ay bulshadu hoggaamiso (EDC-led).**

Gudida bulshadu waxay ku qeexday dhisitaanka awoodda wax kasta oo loo baahan yahay si ururku u gaadho heerka xiga ee hawl-gal, barnaamij, dhaqaale, ama bisayl urureed. Kuwa soo socdaa waa tusaalayaal waxqabadyada karti-dhisidda:

#### *Kobcinta dadka:*

- Hawlaha lagu xoojinayo, lagu dhisayo laguna taageerayo ilaha aadanaha, sida horumarinta HR, siyaasadaha iyo qaabdhismeedka maamulka; horumarinta xeeladaha qorista iyo sii haynta; deeq bixinta taageerada caafimaadka maskaxeed, la talinta iyo tababarka; maamulka iskaa wax u qabso iyo kor u qaadidda; ballaarinta hogaaminta dhalinyarada sida shirarka la talinta; iyo kordhinta aqoonta shaqaalaha/xuquuqda shaqaalaha.
- Qorshaynta iyo fulinta hindisayaasha EDI iyo tallaabooyinka dib-u-heshiisiinta iyo dhisidda shabakadaha iyo iskaashiga.

#### *Nurturing systems and structures:*

- Building or acquiring systems and structures to increase capacity and becoming trained in those systems. For example, contact management systems, financial administration and accounting systems, systems for digital operations and communication tools and systems.
- Building plans and structures to enable growth, such as developing a communications strategy and/or fundraising strategy; and conducting a governance review and governance training.
- Building systems and structures for compliance and responsiveness to established and emerging accountabilities, for example data management and privacy, health and safety responsibilities, and accessibility and Accessibility for Ontarians with Disabilities Act (AODA) compliance.

#### *Nidaamyada Kobcinta iyo qaababkooda:*

- Helitaanka xirfadaha, aqoonta iyo ama agabka loo baahan yahay si ay u taageeraan horumarinta tayada iyo/ama awoodda ku dhaqanka bulsho si loo daboolo baahiyaha bulshada.
- Helitaanka xirfadaha iyo aqoonta iyo ama agabka lagu taageerayo kobcinta barnaamijka iyo adeegga, tusaale ahaan qiimaynta iyo dib-u-qaabaynta, xirfadaha xidhiidhka iyo midka dadweynaha oo ay ku jirto qoraalka deeqda.

## **Sida loo codsanayo**

Ururadu waxay codsan karaan iyagoo buuxinaya EOI bogga HCF ee <https://www.grantrequest.ca/application.aspx?sid=5831&fid=35206>.

Qaybaha 1 iyo 2 waa in lagu dhammeeyaa qoraal, iyada oo la marayo bogga. Qaybta 3 waxaa lagu dhamayn karaa qoraal ahaan bogga internetka, ama waxa

lagu soo gudbin karaa muuqaal ama waraysi. Habka loo buuxinayo oo dhamaystiran Qaybta 3 waxaad ka heli kartaa bogga.

Ururada dooranaya waraysi afka ah Qaybta 3 ee EOI waa in ay u sheegaan HCF waxa ay damacsan yihiin Isniinta 18ta Maarso, 2024, si ay u diyaarsadaan waraysi ka hor waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga. Wareysiyada waxaa la qaadi doonaa 21ka Maarso ilaa Maarso 26, 2024. La xiriir Elizabeth Webb, Isuduwaha Deeqaha, iimaylka [e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca](mailto:e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca), si aad u diyaarsato waraysi ama haddii aad wax qabto su'aalo ah oo ku saabsan codsiga.

Ujeedooyinka qorshaynta, su'aalaha codsiga waxaa laga heli karaa <https://www.hamiltoncommunityfoundation.ca/pgpappquestions> ; soo gudbinta waa in lagu soo gudbiyaa Bogga, kaas oo laga heli karo xiriirka hoose ku qoran:

Uga codso internet halkaan:

<https://www.grantrequest.ca/application.aspx?sid=5831&fid=35206>

### **Waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga waa Talaado, 26ka Maarso, 2024 5:00 galabnimo**

**Kulamada macluumaadka waxaa la qaban doonaa Khamiista 7da Maarso 10:00 subaxnimo, iyo Isniinta 18ka Maarso 3:30 galabnimo.** Keydso taariikhaha, Bogga is-diiwaan gelinta dhawaan ayauu furmayaa

Kahor intaadan dalban, fadlan si taxadar leh u aqri waxyaabaha soo socda:

- Si looga fogaado caqabadaha farsamo ee daqiiqadaha ugu dambeeya, ha sugin ilaa daqiiqadda ugu dambeysa si aad u gudbiso codsigaaga. Boggaan waxaa loogu talagalay inuu xidhmo 5:00 galabnimo
- Waxa ku jira codsigaaga iyo foomamka lagagaaga baahan yahay MA KEYDINAYO intaad wax qorayso. Fadlan hubi inaad si joogto ah ugu dhufato "KEYDI" si aadan u lumin qoraalkaaga. Waxaan kugula talineynaa inaad ku qorto macluumaadkaaga dukumeenti Word ah, ka dib koobiyaaree kadibna ku dheji foomka internetka.
- Hubi inaad haysatid kuwan soo socda ka hor inta aadan billaabin codsigaaga:
  - Lambarka Sadaqada oo Diwaangashan (ha ahaado hay'adda codsada ama kafaala-qaadayaasha maaliyadeed)
  - Annual operating budget for your organization
- Si aad u buuxiso codsigaaga, waa inaad soo gudbisaa waxyaabaha soo socda:
  - Liiska xubnaha ka guddiga hadda jira (ururka heysta heerka sadaqada)

- Nuqulka miisaaniyada hawlgelinta ee sanadkan (ururka haysta heerka sadaqada)
- Kuwa soo socdaa waa hawlo ama kharashyo aan u qalmin maalgelin:
  - Mashaariic maaliyadeed oo waaweyn/ololaha waaweyn
  - Lacag ururinta kharashaadka iyo tabarucaadka ololaha
  - Lacag ururinta kharashaadka iyo tabarucaadka ololaha
  - Codsiyada hibaynta ama khasaare maaliyadeed
  - Codsiyada dib-u-noqoshada ah (kharashyada la galay ka hor muddada maalgelinta)
  - koox la kafaalad qaadayo
  - Dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee ay mamnuucday waaxda Dakhliga Kanada [Canada Revenue Agency](#)
  - Kafiil-qaadyada dhacdooyinka
  - Hawlaha ka baxsan Hamilton ama aan faa'iido gaar ah u lahayn dadka deggan Hamilton
  - Hawlaha ama adeegyada ay ku jiraan barnaamijyada caqiidada ku salaysan
  - Hawlaha ay bixiyaan ururrada caqiidada ku salaysan ee aan hubin karin in faa'iidada ay gaari doonto meel ka baxsan caqiidadooda. Intaa waxaa dheer, xitaa haddii iimaankolaga yaabo inuusan ahayn shuruudaha ka qaybqaadashada.
  - Dhaqdhaqaaqyada wax u dhimaya, xaddidaya ama ku xad-gudbaya xuquuqaha bini'aadamka ee si sharci ah loogu ilaaliyo Kanada.(Edited)Restore original.

### **Sida muujinta xiisaha loo qiimeyn doono**

EOI-yada ka socda hay'adaha xaqqa u leh waxaa dib u eegis ku sameyn doona Guddiga Bulshada, waxaana lagu qiimeyn doonaa shuruudaha soo socda:

- **Is-waafajinta (25% dhibcaha):** EOI waxay la jaanqaaddaa mudnaanta maalgelinta, iyada oo xidhiidh cad la leh dhisidda awoodda iyo qaan-gaadhka ururka. Hadafka ama guulaha shaqada la soo jeediyay waa kuwo waaqici ah oo ku salaysan maalgelinta la hayo.
- **Baahida (20% dhibcaha):** Ururada iyo EOIs waxay muujinayaan la jaanqaadida mudnaanta maalgelinta si ay u taageeraan kobcinta awooda ururada ay hogaamiso EDC.
- **Saamaynta weyn (35% dhibcaha):** Ururradu waxay raadiyaan dhaqaale si ay u taageeraan dadaallada karti-dhisidda taas oo saamayn weyn ku yeelan doonta awoodda loogu adeegayo bulshooyinka EDC ugana jawaabaan baahiyaha iyo arrimaha bulshada hadda iyo mustaqbalka.
- **Ka-qaybgalka iyo iskaashiga (20% dhibcaha):** Ururadu waxay muujiyaan rabitaan iyo karti ay kaga qaybqaataan khibrad iskaashi. Ururadu waxay

khibrad u leeyihiin la shaqaynta qaybaha bulshada ee kala duwan iyo/ama waxay ku talo jiraan inay la shaqeeyaan la-hawlgalayaasha si kor loogu qaado awoodda ay ugu adeegaan dad cusub.

Gudida Bulshadu waxay ka kooban yihiin hogaamiyayaasha bulshada deegaanka oo khibrad qoto dheer u leh adeegyada bulshada iyo waayo-aragnimada nololeed ee EDC-yada kala duwan.

### Taariikho muhiim ah

- **Kulamada macluumaadka:** Khamiista 7da Maarso 10:00 subaxnimo, iyo Isniinta 18ka Maarso 3:30 galabnimo. bogga is-diiwaangelinta ayaa iman doona dhawaan! Hubi <https://www.hamiltoncommunityfoundation.ca/pgp> wixii soo kordha
- **EOI waqtiga ugu dambeeya:** Talaado 26ka Maarso, 2024 at 5:00 galabnimo.
- **Codsadyaasha waxaa la war gelin doonaa:** 2da Abriil, 2024
- **Shirka ururrada Wax-bixineed oo Xidhan:** Taariikhaha kulanka TBD, inta u dhaxaysa 8da Abriil iyo 26ka Abriil, 2024.

### Kulamada Warbixineed

Keydso taariikhaha: Khamiista 7da Maarso 10:00 subaxnimo, iyo Isniinta 18ka Maarso 3:30 galabnimo. Is-Diiwaangelinta ayaa imanaysa dhawaan, hubi <https://www.hamiltoncommunityfoundation.ca/pgp> wixii soo kordha.

### Qeexitaanno

Ujeedada EOI-gaan, waxa soo socda ayaa lagu qeexay sida:

**Muujiinta Xiisaha (EOI):** Bayaanka ururka ee xiisaha ka qayb qaadashada ururrada deeq Bixinta mashruuca. EOI-yada waxay ka jawaabi doonaaan su'aalaha gaarka ah ee ay soo saaraan Guddiga Bulshada waana in lagu soo gudbiyaa marinka deeqaha ee HCF.

EDC- ay Hogaamiso: Ururada muujiya saddexdaan astaamood ee soo socda: (1) hoggaanka inta badan, guddiga iyo shaqaaluhu waxay ka tarjumayaan dadweynaha (dadka) u adeegay EDC; (2) amar gaar ah oo loogu adeegayo dadweynaha (dadka) EDC; (3) hawlgal iyo hawlo lagu wargeliyay waayo-aragnimada EDC iyo aqoonta.

**Capacity-building:** whatever is needed to bring an organization to the next level of operational, programmatic, financial, or organizational maturity. See full description and examples in the "Funding purpose and priorities" section, below.

**Siinta Ka-qaybgalka:** hawlo kala duwan oo uu maal-geliyuhu uu u beddelo go'aan-qaadashada ku saabsan qaybinta maaliyadda kuwa ay aadka u saamaysay.

**Mudnaanta EDC:** Bulshooyinka xaqa u leh ayaa loo aqoonsaday inay yihiin kuwa leh mudnaanta mashruucan deeq-bixinta ka qaybqaadashada, bulshooyinka ay soo mareen maal-gelin joogto ah oo ay bixiyaan hay'adaha samafalka.

- 2SLGBTQ+
- madow
- dhagool iyo naafo
- dadka asalka ah
- la faquuqay
- dumar, gabdho iyo ginsiga kala duwan

### **Su'aalo?**

Fadlan ka hubi su'aalaha Inta badan la isweydiiyo  
<https://www.hamiltoncommunityfoundation.ca/pgpfaq>

FAQ waxaa la cusboonaysiin doonaa Isniin kasta ilaa iyo 21ka maarso, 2024 kaasoo leh su'aalo caadi ah oo laga jawaabayo ilaa dhamaadka xilliga soo gudbinta EOI.

Su'aalaha waxaa loogu soo diri karaa iimeyl  
[e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca](mailto:e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca)

### **La xiriir**

Elizabeth Webb, isku dubaridaha deeqda  
[e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca](mailto:e.webb@hamiltoncommunityfoundation.ca)

905-523-5600 x 249